# Waaxda Booliska Seattle
# Body-Worn Video Program (Barnaamijka Fiidiyaha Jirka Lagu Xirto)

## Hadafka Barnaamijka

Si loo xoojiyo kalsoonida bulshada ee Waaxda Booliska Seattle (SPD) iyo siinta dheelitirnaan weyn ee tallaabooyinka sarkaalka.

Qorista fullinta isdhaxgalka sharciga u dhaxeeyo saraakiisha iyo xubnaha bulshada ee siiyaa warbixin qiimo leh saraakiisha la xisaabtanka iyo baaritaanada dambiga wax ku oolka ah.

## Baaxada

- 850 leenka hore, saraakiisha labisan oo dhammaan aagaga waxay xiranayaan kaamirooyin
- Qaar ka mid ah qeybaha gaarka ah (SWAT, saraakiisha taraafikada mootada, iwm.) waxay xiranayaan kaamirooyinka
- Baabuurta roondada waxay sii joogteynayaan inay isticmaalaan kaamirooyinka fiidiyaha ee ku dhagan baabuurtooda roondada.

## Sharaxaadaha

- SPD waxay heshiis lagalayaan Axon oo kaamirooyinka, keydka casriga ah, iyo softaweerka
- Saraakiisha labisan waxay ku xiranayaan kaamirooyin xabadkooda
- Fiidiyowyada waa la qarinayaa oo si badbaado ah loogu keydinaa kumbiyuutaro gaar ah, oo aaga ka baxsan gelitaanka kumbiyuutarka ("daruurta")
- Gelitaanka tooska ah ee sawirada fiidiyowga la keydiyay waxay ku xadidanyihiin shaqaalaha gaarka ah ee SPD kaliya
- Fiidiyowyada loo daayo si guud ahaan ama hay'adaha kale ee xaaladaha gaarka ah, oo ay la jiraan qeybaha xasaasiga ah ee ku cowlan sharciga gobolka
- Siideynta fiidiyaha waxay noqon kartaa sabab la xiriirto codsiga bulshada/warbaahinta, isticmaalka sida cadeynta dacwad qaadida, ama sida qeyb ka ah baaritaanka

## Taariiqda

- Baaritaanka tijaabada ee horaantii 2015 – falcelinta bulshada iyo sarkaalka ee lagu cabiray isticmaalka kaamirada
- Heshiiska ay la saxiixeen Axon ee qalabyada kaamirada ee Diseembar 2016, waxaa xiggo nidaamka dalbashada tartanka ah
- Barnaamijka tijaabada sadexda bilood oo ay la jiraan saraakiisha baskiilka West Precinct waxay bilaabeen Diseembarta 2016 si la isugu keeno warbixinta ee diyaarinta isticmaalka balaaran ee waaxda
- Gudaha Maajo 2017, xeerka fiidiyaha xirashada jirka ee SPD waxaa ansixiyay garsooraha faderaalka sida qeyb ka ah heshiiska sharci ahaanta ugu xiran Department of Justice (Waaxda Cadaalada)

## Ka Qeybgalka Bulshada

Seattle City Council (Gollaha Caasimada Seattle) oo ay jaheeyaan SPD si ay u sameeyaan labo wareegyada ee ka qeybgalka bulshada ee barnaamijka. Nidaamka waxaa ku jiro kulama joogta ah oo ay la jiraan xubnaha bulshada ee hay'adaha sida Seattle Community Police Commission (Guddiga Booliska Bulshada Seattle) , American Civil Liberties Union (ACLU, Ururka Xoriyada Rayidka Mareykanka), iyo Coalition Ending Gender-Based Violence (Isbaheysiga Soo Afjarida Rabshada Jinsiga Ku saleysan)), **wadahadalada koox balaaran** (iyo 90+ hogaamiyayaasha bulshada ee la casuumay), iyo **kulamada bulshada**.

## Heerka Hadeer

- Seattle City Council waxay u siidaayeen lacagaha mashruuca gudaha Febraayo 2017
- Duqa magaalada ayaa sameeyay Amarka Fullinta 2017-03, oo ku amrayo SPD inay bilaabaan tababarka sarkaalka Caasimada oo dhan iyo howlgelinta kaamirada jirka
- Kaamirooyinka waxaa lagu howlgeliyaa si ku saleysan xaafad-ku-xaafad, ee jadwalkaan: Xaafiska Galbeedka (West Precinct) – Sebteembar 2017, Xaafiska Wuqooyiga (North Precinct) – Ocktoobar 2017, Xaafiska Bariga (East Precinct) – Nofeembar 2017, Xaafiska Koonfurta (South Precinct) – Diseembar 2017, Xaafiska Koonfurta galbeedka (Soutwest Precinct) – Janaayo 2018

Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan booqo: www.seattle.gov/police/bodyworn
La cusbooneysiiyay: Diseembar 14, 2017

## Markii Saraakiisha Bilowaan/joojiyan Duubitaanka

**Bilow Duubitaanka**

- Wacitaanka lagu xiriiriyay 911
- Joojinta taraafikada iyo shakiga macquulka ah ("Terry")
- Aragtida sarkaalka ee howsha dambiga
- Xiritaanka iyo qabashada
- Raadiyaa iyo liiska alaabaha gawaarida, dadka, ama dhismooyinka
- Gaadiidka laga shakiyay
- Dabagalka gaariga
- Su'aal weydiinta shakiyada, dhibanayaasha, iyo marqaatiyada

**Jooji Duubitaanka**

- Dadka dagan ama qofka xaqa u leh inuu guriga ku jiro ayaa ku jaheeyo sarkaalka inuu damiyo kaamirada ka hor inta aysan gelin dadka dagan ee gaarka ah (illaa dambi uu socdo ama saraakiisha ay qabaan damaanad)
- Sarkaalka ayaa dhameystiray baaritaankooda
- Waxaa jiro suurtogal yar ee sarkaalka xiriir dheeraad ah la yeelanayo qof walba ee dhacdada ku jiro

## Markii Saraakiisha Aysan Duubin ama Aysan Ka Taxadarin Duubitaanka

**Ha Duubin (Markii Laga Rebo Ujeedada Fullinta Sharciga Tooska ah, Sida Dambiga Socda)**

- Gudaha Musqulaha
- Gudaha Xabsiyada
- Dhexdhaxaadyada caafimaadka, caafimaadka maskaxda, la talinta, ama xarumaha daaweynta
- Dadka dagan ama qofka xaqa u leh inuu guriga ku jiro ayaa ku jaheeyo sarkaalka inuu damiyo kaamirada ka hor inta aysan gelin dadka dagan ee gaarka ah (illaa dambi uu socdo ama saraakiisha ay qabaan damaanad)
- Dadka sharci ahaan ugu dhaqmayo xoriyadooda hadalka, saxaafada, ururka, isu imaatanka, ama diinta

**Saraakiisha Waxay Go'aan ka Qaadan karaan in La duubayo**

- Goobaha ixtiraamka arimaha gaarka ah ee shaqsiga ama sharafta ka weyn baahida lagu duubayo dhacdada, sida:
    - Goobaha dhimashada caadiga aha ka dacay
    - Ogeysiinta dhimashada
    - Wareysiga dhibaanayaasha caruur ah mise weerar galma ah lagu qaaday
    - Diidmada dhaqanka ama diinta lagu duubayo
    - Markii isticmaalka fiidiyaha jirka lagu xirto ay ka hor istaagaan ama xadeeyaan iskaashiga dhibanaha ama marqaatiga

**Suaalaha Sida Joogtada ah Laysku waydiiyo (FAQ) ee Kaamirada Jirka Lagu Rakibo**

## Mawduucyada

Xuquuqaha........................................................................................................................................1
Arimaha shaqsiga ah............................................................................................................................4
Siyaasada iyo islaxisaabtanka .............................................................................................................8
Tignoolojiyda .....................................................................................................................................10

## Xuquuqaha

**Saraakiishu ma iisheegayaan haddii ay xiranyihin kaamirooyinkooda jirka?**

*Haa. Nidaamka Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle) (WBS) ee udagsan kaamiroyinka jirka lagu xirto ayaa kadoonaaya saraakiisha inay shaqsiyaadka usheegaan sida ugu macquulsan, inay xiranyihiin kaamirooyinka wax duuba. Haddii dad cusub soodhexgalaan duubista muuqaalka, saraakiishu waa inay sameeyaan dadaalada macquulka ah si ay ugu sheegaan dadkaas in muuqaal laga duubaayo.*

*Fiiri* Qodabka 5a Farqadiisa yahay 16.090-POL-1 ee nidaamka udagsan WBS buugga *macluumaadka siyaasada.*

**Sidee ayaa loowargalinayaa dadka aan sifiican ugu hadli karin luuqada Ingiriisiga in muuqaal laga duubaayo?**

*Sida kucad siyaasada WBS, shaqaaluhu waxay samaynayaan dadaalka ugu macquulsan si ay ulahadlaan dadka aan Ingiriisiga kuhadlin, kuwa ay kuyartahay fahanka luuqada Ingiriisiga, kuwa dhagaha la', ama dadka dhagaha culus ee muuqaalka laga duubaayo.*

*Fiiri* Qodabka 5a Farqadiisa yahay 16.090-POL-1 ee nidaamka udagsan WBS buugga *macluumaadka siyaasada.*

**Saraakiishu suaalo kusaabsan waxa uu qofku dalka kujoogo mawaydiinayaan ayadoo kaamiradu wax duubayso?**

*Maya, marka laga reebo xaalado aad ukooban sida kucad Seattle Municipal Code (SMC, Xeerka Dawlada Hoose ee Seattle) (4.18) iyo siyaasada WBS (6.020). Qodobadaas waxay qeexayaan in aan booliisku waydiin karin qofka sharciga uu wadanka kujoogo sikastuu kujoogaba, ama uusan samayn karin talaabooyin laxiriira aqoonsiga joogitaanka qofka ee wadan marka laga reebo haddii sarkaalka suaalaha waydiinaayo uu hayo sabab macquul ah oo uu umaleeyo in shaqsiga: (1) horay looga tarxiilay Maraykanka; (2) uu marlabaad yimid Maraykanka; and (3) uu faldanbiyeed kujiro ama horay loogu xukumay faldanbeyeed dhanka sharciga ah. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan kafiiri* SMC Chap. 4.18 *iyo* WBS Qaybta Macluumaadka 6.020*.*

**Muuqaalka mafiirsan karaa xiliga dhacdada?**

*Maya, shaqaaluhu waxay kusheegayaan xubnaha bulshada ee doonaaya inay faylka arkaan si ay ucodsadaan faafinta dadwaynaha.*

*Fiiri Qodabka 16.090-POL-2 ee siyaasada WBS buugga macluumaadka siyaasada si aad u aragto xeerka uga dagsan WBS fiirinta muuqaalada.*

**Maheli doonaa nuqul kamid ah muuqaalka?**

*Waxay kuxirantahay arimaha jira. Sharciga Washington ayaa qeexaaya waxa lagaa doonaayo markaad codsanayso in lagu siiyo nuqulka muuqaalka kaamirada jirka ee ciidanku duubto (kafiiri Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib u eegida Washington) 42.56.240(14) wixii faahfaahin ah). Codsiga waa inuu kujiraa:*

- *Magaca shaqsiga ama shaqsiyaadka kulug leh dhacdada;*
- *Lambarka dhacdada ama kiiska;*
- *Taariikhda, waqtiga, iyo goobta ee dhacdada ama dhacdooyinka; ama*
- *Aqoonsiga sarkaalka sharci fulinta ama sarkaalka kahortaga danbiga ee dhacdada ama dhacdooyinka joogay.*

*Sharciga Washington kumaxadidaayo muuqaalka ay duubto kaamirada kuxiran saraakiisha muuqo aalado gaar ah (kafiiri RCW 42.56.240(14) wixii faahfaahin dheeraad ah), sida marka muuqaal:*

- *Ay kujiraan qaybo un kamid ah xarun caafimaad, talosiin, ama xafiiska barnaamijka baaritaanka;*
- *Ay kujiraan macluumaadka laxiriira macluumaad caafimaad oo ay tahay in uu xafidnaado;*
- *Ay kujiraan sawirada gudaha goob ladaganyahay oo qofku filaayo in arimihiisa qaaska ah aan laga shaacin;*
- *Ay kujiraan sawirada sida loo arko inay yihiin "handadaad,' sida kucad RCW tusaale, kuwo qaawan, qayb ahaan qaawan, kuwo galmo ahaan anshax daro ah;*
- *Ay kujiraan sawirada ilmo yar oo la aqoonsan karo;*
- *Ay kujiraan sawirada qof dhintay;*
- *Ay kujiraan aqonsiga ama hadalada dhibane ama marqaatiga dhacdo laxiriirta rabshada qoyska ama kufsi galmo; ama*
- *Ay kujiraan sawirada goobta shilka halkaasoo dhibanaha ama marqaatiga rabshada qoyska ama kufsiga galmo uu mujiyay inuusan doonayn baahinta muuqaalkooda laduubay ama hadalada ay dhahaan.*

*Makay jiraan xaladaha kor kuxusan, WBS waxay faafin kartaa muuqaalka ayadoo muuqaalka/codka shaqsiga muuqaalka kujira labadalaayo (tashuus lagu xiraayo ama sawirka laqarinaayo) iyo/ama maqalka labadlaayo (codka laga saaraayo). Haddii uusan midna kajirin xaaladaha kor kuxusan, muuqaalka Waxaa lafaafin kara asagoon waxba laga badalin, ayadoo kuxiran in dhibanuhu codsaday in muuqaalka lafaafiyo iyo in kale.*

*Sharciga Washington wuxuu cadayn karaa qaybo kamid ah muuqaal xadgudub ah ama gaar u ah shaqsiyaad kaasoo loo asteeyay inuu yahay mid aan lafaafin karin (kafiiri RCW 42.56.240(14) wixii faahfaahin ah). Waxaad helikartaa nuqul kamid ah muuqaal uu sharciga gobalku u asteeyay mid aan dad waynaha latusi karin haddii:*

- *Aad si toos ah ugu lug leedahay dhacdada;*
- *Aad tahay qareenka matalaaya qof kulug leh dhacdada laxiriirta kiiska faldanbiyeedka ama aad sharaxdo sida muuqaalka aad codsanayso ula xiriiro kiiskaas;*
- *Aad tahay Iskuduwaha Laanta fulinta ee Gudigga Gobalka Washington uqaabilsan Commission on African-American Affairs (Arimaha Bulshada African-American ka ah), Commission on Asian-Pacific Affairs (Arimaha Mujtamaca Asian-Pacific Affairs), ama Commission on Hispanic Affairs (Arimaha qoomiyada Hispanic ga);*
- *Aad tahay qareen matalaaya qof kujira ama suuragaltahay inuu kujiro talaabo dhanka sharciga rayidka ah oo laxiriirta diidmada xaquuqda madaniga ah sida kucad dastuurka federalka ama kan gobalka, ama xad gudub kadhan ah heshiiska xalinta khilaafka ee United States Department of justice (Waaxda cadaalada ee maraykanka) ee xeshiiska deganaaashaha ayaa sharaxdo xiriirka arintaasi laleedahay muuqaalka aad dalbanayso.*

*Fadlan booqo Public Records Request Center ee Webseetka WBS si aad u aragto macluumaadka laxiriira sida loocodsado nuqulada muuqaalada. Haddi aad kulug lahayd dhacdo, laakiin aad khaladay lambarkaaga shilka, Qaybta Faafinada Dadwaynaha ayaa kaacaawinaysa raadinta lambarka.*

**Qofka ku eedaysan shilka ma awoodi kara inuu arko nuqul kamid ah muuqaalka?**

*Qofka ku eedaysan faldanbiyeedka waxaa qabanayaa sharciyada dhammaan codsadayaasha muuqaalka kaamirada jirka ay duubto wuxuuna marayaa isla nidaamka codsadayaasha kale maraan.*

**Wax qarash ah miyaa laygaga qaadayaa codsigayga muuqaalka kaamirada duubtay?**

*Waa suuragal. Sharciga Washington ayaa ufasaxayaa wakaaladaha sharci fulinta maxaliga ah inay qarash macquul ah kaqaadaan si ay uyareeyaan muuqaalka(kafiiri RCW 42.56.240(14) wixii faahfaahin ah).*

*Shaqsiga aan qarashka laga qaadayn waa:*

- *Qof si toos ah ugu lug lahaa dhacdada muuqaalka laga duubay iyo qareenkiisa;*
- *Shaqsiga ama qareenka qofka ee codsada muuqaalka ay kaamirdu duubtay ee laxiriira kiis danbiyeed qofkaas quseeya;*
- *Iskuduwayaasha Laanta fulinta ee Gudigga Gobalka Washington uqaabilsan Commission on African-American Affairs, Commission on Asian-Pacific Affairs, ama Commision onHispanic Affairs;;*
- *Qareenka matalaaya qof kujira ama suuragaltahay inuu kujiro talaabo dhanka sharciga rayidka ah oo laxiriirta diidmada xaquuqda madaniga ah sida kucad dastuurka federalka ama kan gobalka, ama xad gudub kadhan ah heshiiska xalinta khilaafka ee United States Department of Justice ayaa sharaxdo xiriirka arintaasi laleedahay muuqaalka aad dalbanayso.*

*Sharciga Washington ayaa ufasaxayaa wakaaladaha sharci fulinta maxaliga ah inay qarash macquul ah kaqaadaan dadka dalbada nuqulka muuqaalka (kafiiri RCW 42.56.120 for detail).*

**Makadalban karaa sarkaalka boliiska inuusan muuqaal igaga duubin kaamirada jirkiisa kurakiban?**

*Waxay kuxirantahay arimaha jira. Siyaasada WBS ayaa siinaysa saraakiisha booliiska fasax ay kujoojin karaan duubista muuqaalka markay jiraan xaaladaha xusmad arimaha shaqsiga ah ee qofka ay kamuhiimsanaadan duubista shilka. Xaaladaha noocaas ah waxaa kamid noqon kara: goobaha ay dhimasha dabiiciga ah kajirto, ogaysiiska geerida, waraysiga dhibanaha xadgudubka carruurta ama kufsiga galmada, arimaha dhaqan ahaan ama diin ahaan aan la ogolayn in laduubo, ama marka isticmaalka kaamirada wax duubta ay xanibaad kutahaya wada shaqaynta sarkaalku lasamaynaayo qofka dhibanaha ama marqaatiga ah.*

*Sidoo kale, saraakiishu waxay ogolaansho uqaadanayaan duubista goobta kahor intaysan galin guriga qofka. Haddii qof un leh xaquuq sharci; tusaale, dhibane ama marqaati kaasoo ah qofka guriga dagan ama kan xuquuq sharci uleh inuu guriga joogo, uudiido ogolaanshaha duubista goobta, sarkaalku wuxuu joojinayaa dubista muuqaalka. Hase yeeshee, sida kucad siyaasada kaamirada jirka lagu rakibo ee WBS, saraakiishu waxay siiwadayaan duubista codka, ayadoo cidna lagala tashan. Kafiiri* [Qodabka 5 e-f iFarqadiisa 16.090-POL-1 ee buugga macluumaadka](#) siyaasada *SPD.*

## Arimaha shaqsiga ah

**Sidee ayaa kaamirooyinka jirka lagu rakibo loogu isticmaalayaa goobaha bulshada?**

*Waxay kuxirantahay arimaha jira. Sida kucad siyaadada WBS,, saraakiishu waa inaysan si kas ah uduubin goobaha dadku si sharci ay ugu haystaan xoriyadooda hadalka, saxaafada, ururada, kulanada, arimaha diinta, ama xaqa uu uleeyahay inuu dawlada dacwad cabasho ama cadaalad daro kagudbiyo illaa inay jiraan sababo macquul kadhigaaya in falal danbiyeed ay dhacayaan ama dhici rabaan. Sidaas awgeed, saraakiishu waxay duubayaan goobta dadku hawlahooda sharcigu ufasaxay kuhaystaan ama goobaha cibaadada kaliya marka ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamini karo in fal danbiyeed lasamaynaayo ama lasamayn rabo.*

*Maadaama dugsiyada iyo xarumaha bulshadu ay guud ahaan yihiin goobo dadwayne, saraakiishu way duubi karaan muuqaalada sida kucad siyaasada, hase yeeshee, madaama faafinta muuqaalka dhalinta (ilmaha) loo arkaayo inay tahay xadgudub wayn sawirada la aqoonsan karo ee ilmaha yarna gabi ahaanba aan la ogolayn in lafaafiyo, sawirada carruurta ee dugsiga jooga waa laga reebayaa muuqaalka.*

*Kawaran isbitaalada iyo xarumaha caafimaad ayagana?*

*Sida kucad siyaasada WBS, saraakiisha booliisku muuqaal kama duubi karaan gudaha xarun caafimaad, daawayn dhimirka, talo bixinta, ama xarumaha baaritaanada caafimad. Hase yeeshee, haddii saraakiishu ay halkaas ujoogaan fulinta amar sharci oo toos ah, sida danbi faraha lagula jiray, way duubayaan muuqaalka.*

*Kafiiri [Qodabka 5.d Farqadiisa 16.090-POL 1 ee buugga macluumaadka siyaasada SPD](#) si aad u aragto siyaasada WBS uga taala marka wax laduubaayo.*

*Haddii saraakiishu duubaan isbitaalka ama xarun caafimaad ayagoo fulinaaya amar sharci oo toos ah, muuqaalka ay duubaan si wayn ayaa lookala soocayaa (loo jarayaa ama looqarinayaa) codka sax ahna waa lagasoo saarayaa si looga fogaado faafinta macluumaadka xarunta caafimaad ama daawayn ee dadka muuqaalka kujira.*

**Miyaan kujirayaa muuqaalka hadaan ahay marqaati, dhibane, ama eedaysane? Maxaa dhacaaya hadaan soosheego shilka?**

*Waa suuragal. Siyaasada WBS waxay cadaynaysaa in saraakiishu duubaayaan suaalaha ay waydiinayaan dhibanayaasha, eedaysanayaasha, ama marqaatiyaasha.*

*Siyaasada WBS waxay ufasaxaysaa saraakiisha booliiska inay muuqaalka joojiyaan mararka xushmada qofka laduubaayo ay kamuhiimsantahay duubista muuqaalka si loodharo arimaha shaqsiga ah ee qofka ayna kujiraan marka isticmaalka kaamiradu ay keenayso joojinta ama koobida wadashaqaynta dhibanaha ama marqaaiga uusamaynaayo. Hase yeeshee, sida sharcigu siinaayo, saraakiishu waxay siiwadayaan duubista codka, ayadoon cidna looga fasax qaadanayn. Kafiiri* Qodabka 5 Farqadiisa 16.090-POL 1 ee buugga macluumaadka siyaasada *WBS si aad u aragto siyaasada SPD uga taala marka wax laduubaayo.*

*<u>Haddii aad soosheegayso faldanbiyeedka:</u>*

*Saraakiisha waxay ku amraysaa siyasada SPD udagsan inaysan kaamirada shidan mudada ay lahadlayaan shaqsiyaad si iskood ah udoonaayo inay macluumaad kasoo gudbiyaan hawlo faldanbiyeed guud ah oo aan laxariirin dhacdo gaar ah. Tusaale, haddii sarkaal kalahadasho arin kusaabsan dhaqaaq badan oo gaariyaashu kasamaynayaan xaafadaada, maduubayaan goobta.*

*Haddii faldanbiyeed gaar ah usoo sheegto sarkaal wadada taagnaa kaasoo xirnaa kaamirada, waxaa suuragal ah in sawirkaaga laqabto, sababo laxiriira in saraakiishu horay udaareen kaamirada maadaama ay goob dhacdo kadhacday joogeen. Saraakiishu waxay sidoo kale shidi karaan kaamirada sababo laxiriira faldanbiyeedka gaarka ah ee aad soosheegtay, ayagoo muuqaal kaduubaaya. Haddii goob joog aad u ahayd faldanbiyeedka, sarkaalku wuxuu duubi karaa sheekada idin dhexmarta xiliga uu kuwaydiiyo suaalaha laxiriira waxaad aragtay.*

*<u>Haddii aad wadada soconaysay ama aad muuqaalka kasoo dhexmuuqato:</u>*

*Haa. Majirto arimo qofku qaas uleeyahay oo wadada dadwaynaha yaala. Haddii aad kasoo dhexmuuqato gudaha muuqaal bulshada latusay, sawirkaaga <u>lama</u> bixinaayo (qarinaayo ama lama daboolaayo).*

**Mudaaharaadyada maladuubayaa?**

*Waxay kuxirantahay arimaha jira. Siyaasada SPD ayaa sheegaysa in aysan saraakiishu duubi karin dadka sida sharciga umuujinaaya xoriyadooda hadalka, saxaafada, ururka, kulanka, ama diimeed. Hase yeeshee, haddii saraakiishu hayaan cadayn muujinaysa in faldanbiyeed dhacaayo ama uu kormeeruhu ku amro inay muuqaalka duubaan, way shidayaan kaamirooyinka.*

*Kafiiri* Qodabka 5.g Farqadiisa 16.090-POL 1 ee buugga macluumaadka siyaasada *WBS si aad u aragto siyaasada SPD uga taala marka wax laduubaayo.*

**Muuqaalada kaamirada jirka kurakiban maloo adeegsanayaa Adeegyada Difaaca Carruurta iyo kiisaska xabsida?**

*Si lamid ah muuqaalkasta oo booliisku sooduubo, muuqaalka kaamirada jirka kurakiban ay duubto kaasoo lagu faafiyay codsiga Public Records Act (PRA, Sharciga Codsiga Dadwaynaha) ama haddii kale sifo sharci ah lagu faafiyay qofka lasiiyo ayaa u adeegsan kara dacwadaha sharciga ah.*

**Muuqaalka malatusayaa dadwaynaha?**

*Waxay kuxirantahay arimaha jira. Muuqalada lagu duubo kaamirada askarta kurakiban waa diiwaan dadwayne waxaana lagu codsan karaa sida kucad* [Public Records Act (PRA)](). *Golaha sharciga ayaa aqoonsaday walaacyada dhanka axwaasha shaqsiga ah ee laxiriirta muuqaalka ay duubto kaamirada askarta kuxiran iyo sharciga la ansixiyay ee dhaqangalaaya Luuliyo 2019, fulinta sharciga PRA si wax looga qabto walaacyadaan ayadoo ciidanka hawlgalada gobalka oo dhan ay abuurayaan siyaasado rasmi ah oo laxiriira faafinta muuqaalka. Sida kucad sharciga, codsigu waa inuu sharaxaad gaar ah kabixiyaa muuqaalka ladalbanaayo. Tan waxaa loogu talagalay in lasoo koobo codsiyada badan laguna ekaysiiyo tiro balaaran oo muuqaalo ah halkii marba. Waxay usahlaysaa wakaaladaha inay qaadaan qarashka saxda ee laxiriira soojarida muuqaalka/maqalka ee lasiinaayo codsadayaasha kuwaasoo aan kujirin muuqaalka ama aan haysan cadayn muujinaysa door ay kulahaayeen muuqaalka. Tan waxaa sidoo loogu talagalay in lasoo koobo codsiyada badan laguna ekaysiiyo xadad badan oo muuqaalo ah.*

*Sharciga ayaa sidoo kale tixgalinaaya in faafinta muuqaalo gaar ah ay keeni karaan xadgudub wayn oo kadhan ah shaqsiyaad: kuwaasoo laga duubay guriga gaarka ah ee qofka, xarumaha iyo daawaynta caafimaadka iyo xanuunada dhimirka, sawiro cabsi galin ah, sawirada caruurta, sawirada badka dhintay, marqaatiyaasha/dhibnayaasha DV, iyo hoyga/xarunta barnaamijka DV ga. Haddii muqaal ay sawirada noocaas ah kujiraan lacodsado, waxaa kaliya latusayaa codsadaha haddii maslaxad dhanka sharciga ah ugu jirto dadwaynaha, qaybaha muuqaalada kujira muuqaalka ee loo arko inay xadgudub wayn kuyihiin arimaha shaqsiga ah ee qofkale waxay ubadantahay i lagasaaro muuqaalka.*

*<u>Kawaran haddii saxaafadu soocodsato?</u>*

*Saxaafada waxaa qabanaya sharciyada dhammaan codsadayaasha muuqaalka kaamirada jirka ay duubto wuxuuna marayaa isla nidaamka codsadayaasha kale maraan.*

**Goorma ayaa muuqaalka 'lajarayaa'?**

*Muuqaalka waxaa lajaraa (wajiyada iyo waxyaabaha qofka lagu aqoonsankaro oo lajaro ama laqariyo) marka dadwaynaha latusaayo ayna kujiraan macluumaad si guud xadgudub ugu ah bulshada ama ay kujiraan waxyaabo uu qofku u arko inay arimo shaqsiyadiisa qarsoon yihiin - arimaha noocaan ah waxaa si wayn uhagaaya harciga Gobalka (kafiiri* [RCW 42.56.240(14)]() *wixii faahfaahin dheeraad ah). Si guud, tani waxay kadhigantahay in muuqaalka ay kujiraan sawirada ee lafaafinaayo kuwasoo loo arko inay xadgudub wayn kuyihiin shaqsiyaad macquul ah illaa xad:*

- *Ay kujiraan qaybo kamid ah xarun caafimaad, talosiin, ama xafiiska barnaamijka baaritaanka;*
- *Ay kujiraan macluumaadka laxiriira macluumaad caafimaad oo ay tahay in uu xafidnaado;*
- *Ay kujiraan sawirada gudaha goob ladaganyahay oo qofku filaayo in arimihiisa qaaska ah aan laga shaacin;*
- *Ay kujiraan sawirada sida loo arko inay yihiin "handadaad," tusaale, kuwo qaawan, qayb ahaan qaawan, kuwo galmo ahaan anshax daro ah;*
- *Ay kujiraan sawirada ilmo yar oo la aqoonsan karo;*
- *Ay kujiraan sawirada qof dhintay;*

- *Ay kujiraan aqonsiga ama hadalada dhibane ama marqaatiga dhacdo laxiriirta rabshada qoyska ama kufsi galmo; ama*
- *Ay kujiraan sawirada goobta shilka halkaasoo dhibanaha ama marqaatiga rabshada qoyska ama kufsiga galmo uu mujiyay inuusan doonayn baahinta muuqaalkooda laduubay ama hadalada ay dhahaan.*

**Side ayaa dadka muuqaalkooda looga saarayaa muuqaalada?**

*WBS waxay kajartaa muuqaalada qaybaha laga saaraayo ayadoo adeegsanaysa software kaasoo usahlaaya saarida shoocaac ama daah sawirada si loo qariyo astaamo kasta oo la aqoonsan karo, ayna kujiraan wajiyada, dharka, farshaxanka jirka, ciwaanada, sawirada, dukumiintiyada, shaashadaha kumbuyuutarada, magcyada, iwm. Qaybaha laga qarinayo waxay kujiraan muuqaalka, sidaas awgeed lagama saari karo muuqaalka. Shaqaalaha WBS ayaa xaqiijinaayo raacida talaabooyinka qarinta qaybahaas soo xaqiijiyo in sawirada/codadka lagaran karo laga saaro meesha. Faylalkaan laqarinaayo waxaa lagu haynayaa laguna darayaa nuqulkii hore, ee aan waxba laga jarin.*

**Kaamirooyinka kurakiban askarta malagu duubi karaa arimaha aan danbiyada ahayn, ee dacdawada madaniga ah?**

*Si lamid ah muuqaalkasta oo booliisku sooduubo, muuqaalka kaamirada jirka kurakiban ay duubto kaasoo lagu faafiyay codsiga PRA, ama haddii kale sifo sharci ah lagu faafiyay qofka lasiiyo ayaa u adeegsan kara dacwadaha sharciga ah.*

**SPD mawaxay isticmaalaysaa software ka wajiyada aqoonsada si loo aqoonsado dadka muuqaalka kaamirada kujira?**

*SPD magaliso muuqaalada kaamarida jirka lagu xirto ay duubto sofware ka wajiyada aqoonsada. WBS waxay adeegsan kartaa software ka qajiyada aqonsada si ay iskugu fiiriso sawirada lagu qaaday kaamirada ee muuqaalka kudhexjira iyo kuwo horay kaydka ugu jiray si mararka qaar ay iskugu babacdhigto oo kale sawirada muuqalada kaamirooyinka gaariyaasha kujiran ama kuwa gaarka looleeyahay marka ay WBS ogolaansho ama fasax sooxiris ah qaadanayso. Siyaasada WBS  ee softawre ka wajiyada aqoonsada ayaa xadidaysa xaaladaha la isticmaali karo software kaas. WBS waxay kaliya adeegsan kartaa sotware ka wajiyada aqoonsada mararka sarkaalku uu hayo sawiro aan lagaranayn ee qof looga shakiyay inuu faldanbiyeed kulug leeyahay, wuxuuna kaliya software ka u adeegsan karaa iskufiirinta sawirada horay uyaalaya iyo kuwa uu rabo inuu hubiyo. WBS ma adeegsato muuqaalada "tooska loodaawado" arimo laxiriira aqoonsiga iskufiirinta sawirada wakaalad kasta oo dalbanaysa caawimaada iskufiirinta sawirada ee kaydka WBS sababo laxiriira baaritaanka faldanbiyeed waa inay buuxisaa dhammaan shuruudaha kucad siyaasada WBS. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kafiiri* Qodobka 12.045 *ee kuqoran buugga macluumaadka siyaasada WBS.*

**Kawaran hadaan kujiro muuqaalka aana rabin in lafaafiyo?**

*Qofka magaciisa kujiro muuqaalka ama muuqaalku uu sigaar ah uquseeyo wuxuu xaq sharci ah uleeyahay sida kucad RCW 42.56.540 taasoo ah inuu talaabo sharci kaqaado siidaynta muuqaalo kasta oo uu isleeyahay waa khalad in lasiidaayo. Haddii WBS ay doonto inay faafiso muuqaalka ay kujiraan macluumaadka la aaminsanyahay inay xadgudub wayn kuyihiin qofka laakiin umuuqda inay maslaxada sharciga ah ee dadwaynuhu kujirto, WBS waxay inta badan ogaysiis siinaysaa qofka kujira muuqaalka ayadoo usheegaysa in muuqaalada lasoo dalbaday ay*

*siinayso cida codsatay illaa bixinta muuqaalkaas kahor uu qofka muuqaalka kujira kasooqaato cadayn maxkamadeed oo xarimaysa faafinta muuqaalka ee Maagalada Saettle maamulkeeduna ansixiyaan.*

*Madalban karaa joojinta muuqaalka latusaayo dadwaynaha?*

RCW 42.56.540 *wixii faahfaahn ah). Waa inaad soojeedisaa oo cadayn ugudbisaa si loosoosaaro hakin Kumeelgaar ah oo Mamnuucaaya faafinta ayna soosaarto* King County Superior Court (Maxkamada Sare ee Degmada King), Ex Parte Department (Waaxda Ex Parte)*. Amarka Maxkamada ee kurabo joojinta waa* CR 65*. Amarka sharciga ah ee Maxkamada Deegaanka Degmada King waa* LCR 65*. Waa inaad dalbataa talosiin dhanka shariga ah oo aad kahesho dhinac madax banaan haddii aad su'aalo kaqabto qaadista xanibaada.*

## Siyaasada iyo islaxisaabtanka

**Waa maxay yoolalka barnaamijka kaamirada laxidho?**

*Hadafyada laga leeyahay barnaamijka kaamirada laxidho waa in kor looqaado kalsoonida dadwaynuhu kuqabaan Waaxda Booliiska ee Seattle ayadoo shaqada saraakiisha laga dhigaayo mid hufan. Duubista isdhaxgalka fullinta sharciga ee dhaxeeyo saraakiisha iyo xubnaha bulshada ee siiyaa warbixin qiimo leh saraakiisha la xisaabtanka iyo baaritaanada dambiga wax ku oolka ah.*

**Kaamirooyinka laxidho maloo adeegsadaa homarinta hufnaanta siyaasada iyo aruurinta cadaymaha?**

*WBS uma samaynin kaamirooyinka laxidho in lagu aruuriyo cadaymo kiiseed. Cadayntu, hase yeeshee, waa nidaam kuxiran waxyaabo kaladuwan iyo nidaamya WBS adeegsato, kaamirooyinka laxirtana waa qayb kamid ah. Tusaale, codka laga duubo taleefoon soowacay 911 waaa loo adeegsadaa cadayn ahaan marka dacwadaha danbiyada la oogaayo. Muuqalada ay soduubaan kaamiroyinka laxidho waxaa loo adeegsan karaan cadayn ahaan sababo laxiriira hufnaanta sarkaalka iyo dacwooyinka dadwaynaha labadaba.*

**Sidee ayaa saraakiisha loogu tababaraa adeegsiga kaamirooyinka jirkooda kurakiban?**

*Kahor intaan sarkaal lagu xirin kaamirada jirkiisa lagu rakibaayo, waa inu sarkaalku maraa tababar. Tababarkaan waxaa lagu baranayaa siyaasada udagsan kaamirada laxidho ee WBS, shaqada kaamirada, iyo maaraynta muuqaalka.*

*Isbadalada iyo cusboonaysiinada lagu sameeyo siyaasada udagsan barnaamijka waxaa lagu barayaa saraakiisha tababar lagu bixinaayo nidaamka WBS, kasoo lasoconaaya xaqiijinaayana in saraakiishu barteen ayna fahmeen macluumaadka lasiiyay.*

**Goorma ayay tahay in saraakiishu damiyaan ama daaraan kaamiradooda?**

*Xiliyada saraakiishu daarayaan kaamirooyinkooda:*

**Bilow Duubitaanka**

- Wacitaanka lagu xiriiriyay 911
- Joojinta taraafikada iyo shakiga macquulka ah ("Terry")
- Aragtida sarkaalka ee howsha dambiga
- Xiritaanka iyo qabashada

**Jooji Duubitaanka**

- Dadka dagan ama qofka xaqa u leh inuu guriga ku jiro ayaa ku jaheeyo sarkaalka inuu damiyo kaamirada ka hor inta aysan gelin dadka dagan ee gaarka ah (illaa dambi uu socdo ama saraakiisha ay qabaan

- Raadiyaa iyo liiska alaabaha gawaarida, dadka, ama dhismooyinka
- Gaadiidka laga shakiyay
- Dabagalka gaariga
- Su'aal weydiinta shakiyada, dhibanayaasha, iyo marqaatiyada
damaanad)
- Sarkaalka ayaa dhameystiray baaritaankooda
- Waxaa jiro suurtogal yar ee sarkaalka xiriir dheeraad ah la yeelanayo qof walba ee dhacdada ku jiro

*Markii Saraakiisha Aysan Duubin ama Aysan Ka Taxadarin Duubitaanka*

**<u>Ha Duubin (Markii Laga Rebo Ujeedada Fullinta Sharciga Tooska ah, Sida Dambiga Socda)</u>**

- Gudaha Musqulaha
- Gudaha Xabsiyada
- Dhexdhaxaadyada caafimaadka, caafimaadka maskaxda, la talinta, ama xarumaha daaweynta
- Dadka dagan ama qofka xaqa u leh inuu guriga ku jiro ayaa ku jaheeyo sarkaalka inuu damiyo kaamirada ka hor inta aysan gelin dadka dagan ee gaarka ah (illaa dambi uu socdo ama saraakiisha ay qabaan damaanad)
- Dadka sharci ahaan ugu dhaqmayo xoriyadooda hadalka, saxaafada, ururka, isu imaatanka, ama diinta

**<u>Saraakiisha Waxay Go'aan ka Qaadan karaan in La duubayo iyo in kale</u>**

- Goobaha ixtiraamka arimaha gaarka ah ee shaqsiga ama sharafta ka weyn baahida lagu duubayo dhacdada, sida:
  - Goobaha dhimashada caadiga aha ka dacay
  - Ogeysiinta dhimashada
  - Wareysiga dhibaanayaasha carruur ah mise weerar galma ah lagu qaaday
  - Diidmada dhaqanka ama diinta lagu duubayo
  - Markii isticmaalka fiidiyaha jirka lagu xirto ay ka hor istaagaan ama xadeeyaan iskaashiga dhibanaha ama marqaatiga

**Yaa heli kara muuqaalada lakaydiyay?**

*Saraakiishu waxay markay rabaan fiirin karaan muuqalada ay ayagu duubeen, inkastoo siyaasada WBS ay xadidayso noocyada kamid ah muuqalada ay duubeen ee ay fiirin karaan kahor intaysan diyaarin warbixinta booliiska (ma fiirin karaan muuqaalka kadib markay shil ay awood adeegsadeen galaan, sida sarkaal wax tooganaya, kahor intaysan qorin warbixinta booliiska). Kormeerayaashu waxay fiirin karaan dhammaan muuqaalada saraakiisha oo dhan si ay ula xisaabtamaan ayna tababaro usiiyaan saraakiisha. Shaqaalaha kaladuwan ee WBS ayaa sidoo kale fiirin kara muuqaalada si ay shaqadooda ugutaan, ayna kujiraan saraakisha danbi baarista,ee Office 0f Professional Accountability (Xafiiska Islaxisaabtanka Shaqada), Kooxda Danbi Baarista Ciidanka, Kooxda Dib U eegista Ciidanka, Qaybta Muuqalada, Qaybta Faafinada Dadwaynaha, iyo Department of Information Technology (Waaxda Macluumaadka Casriga ah). Shaqaalaha kaladuwan ee SPD ayaa haysta fasaxyo kaladuwan oo ay kufiirin karaan muuqaalada ayna ku adeegsandaan software ka maaraynka kaamirada jirka lagu rakibo, iyadoo hadba kuxiran shaqada uu shaqaalahaas qabto.*

**Muuqaalka mala tusayaa laamaha amaanka ee dawlada federalka ah?**

*Majiraan wakaalado kabaxsan WBS oo fiirin kara muuqaalada kaamirada jirka askarta kurakiban ay sooduubto, xataa laamaha federalka maheli karaan. Hase yeeshee, WWBS waxay muuqaalada lawadaagi kartaa laamaha heer federal taas qayb ka ah baaritaan iskudhaf ah aa haddii loobaahdo ay keenaan amar maxkamaded. Laamaha heer federal ee dawaladu waxay leeyihiin xaq lamid ah kan bulsho waynta oo ay kucodsan karaan muuqaalka.*

**Saraakiishu mafiirin karan muuqaalada kaamiradooda duubto?**

*Inta badan, saraakiishu dib u eegis ayay kusamayn karaan muuqaalada ay duubaan kahor intaan warbixinta booliiska ladiyaarin. Halka mar ee aan loo ogolayn saraakiishu inay fiirinaayaan muuqalada ay duubeen kahor intaan warbixinta ladiyaarin ayna bixin waraysi waa marrka sarkaalku uu adeegsado awood xad dhaaf ah, sida in sarkaalku wax toogto. Haddii sarkaalku adeegsado awood xad dhaaf ah, saraakiishu waxay kaliya dib ufiirin karaan muuqaalkooda markay faahfaahin kabixiyaan dhacdadu siday udhaday.*

*Fiiri* [Qodabka 3, Farxada 16.090-POL-2]() *ee macluumaadka WBS.*

**Booliisku ma awoodi doonaan inay muuqaalada waxkabadalaan si maslaxadoodu kujirto?**

*Siyaasada WBS ee kaamirooyinka laxirto ayaa cadaynaysa in "shaqaaluhu aysan faragalinkarin, badali kari, ama tirtiri karin muuqaal" (waxaa jira marar la ogolyahay tirtirista muuqaalka ayadoo laraacaay tilmaamo loogu talagalay) ([Farqada 16.090-POL-2, Qodobka 2]()). Nidaamka kaamirada jirka lagu xirto wuxuu kaydinayaa macluumaad tafaftiran kaasoo muujinaaya talaabooyinka uu qaaday isticmaalaha kaamiradu - ayna kujiraan waxkabadalka, tirtirista, wareejinta, iwm., iyo macluumaadka kusaabsan qofka qaaday talaabooyinka iyo xiliga laqaaday. Ayadoo shaqaalaha WBS qaar kamid ah ay qarin karaan ayna/ama wax kabadali karaan muuqaalka taasoo qayb ka ah shaqadooda, muuqaalka asalka ah, ee aan waxba laga badali yaa lahaynayaa mudada kucad siyaasada kaydinta ee WBS.*

**Maxaa dhacaaya haddii sarkaal uu kuxadgudbo siyaasada udagsan kaamirooyinka laxirto?**

*Siyaasada WBS ayaa qeexaysa in shaqaaluhu masuul kayihiin ilaalinta sharciga federalka, kan gobalka, sharciyada magaalada, siyaasaadka magaalada, siyaasaadka WBS,, awaamiirta iyo sharciyada tilmaamaha gaarka ah ee lasiiyo, tababarada waaxda, iyo heshiisyada ixtiraam wadareedka iyo sharciyada laxiriira shaqaalaha. Haddii shaqaaluhu aysan raacaynin siyaasaadkaan iyo sharciyadaan, talaabooyinkooda waxaa lagu samayn karaa baaritaan waxaana baaraaya Xafiiska Isla xisaabtanka Booliiska waxaana laga qaadi karaa talaabooyin dhanka anshaxa kudhaqan la'aanta sharciga ah.*

## Tignoolojiyda

**Shirkadee ayay WBS kasoo qaadataa kaamirooyinka laxirto sideese kudooratay shirkadaas?**

*Shirkada adeega magaaada siisa waa Axon. Heshiiska ay hada nagula jiraan waa mid soconaaya shan sano. Marks uu dhammaado xiliga qandarasku, magaaladu waxay siin kartaa hal sano ee dheeraad ah ama waxay dooran kartaa inay dalabaadka kaamirooyinka laxirto sooxayiisiiso.*

*<u>Sidee ayaa Axon lagu doortay?</u>*

*Purchasing Contract Services Division (Waaxda Magaalada Seattle uqaabilsan Iibka iyo Adeegyada Qandaraasyada) ayaa siinaysa Request For Proposals (RFP) (Codsiga Dalabaadka) oo ay kudonayso nidaam muuqaalka duuba oo jirka lagu rakibo bishii Sebteembar 10 keedii, 2016. Waxa lamaray nidaam tartan kudhisan, oo shirkado badan ay codsiyadooda soodireen. Codsiyadu waxay mareen labo wareeg oo lagu kalasaaraayay, ayadoo shirkada ugu buunda saraysa wareegga labaad lasiinaayo qadaraaska. Xubnaha qiimaynaayay codsiyada*

*waxaa kamid ah xunaha WBS, Department of Information Technology ee Seattle, Madaxa Macluumaadka Maanka ee Magaalada, Xafiiska Qareenka Magaalada, City Attorney Office (Xafiiska Miisaaniyada ee Mgaalada), iyo Lataliye madanbanaan oo IT ga kudheereeya.*

*Ayadoo qarashka kubaxaaya uu ahaa lafdhabarka doorashada codsayaasha, ma ahayn kaliya dookhyada laqiimaynaayay. Waxyaabaha kale ee laga fiirinaayay waxaa kamid ahaa naqshada nidaamka, noocyada kaamirada, kaydka kaamirada, maaraynta isticmaalaha ee kaamirada, shaqada nidaamka maaraynta muuqaalka, shaqada faafinta dadwaynaha, isbadalada nidaamka, maaraynta iyo taageerada mashruuca, tababarada, xeelada iyo qorshaha hiigsiga ee shirkada, qorshaha iskudhafka ah, jawaabta amaanka, tixraacyada, iyo tijaabinta madaxa banaan ee noocyada kaamirada. WBS madonayn inay qaadato kaamiro raqiis ah laakiin aan buuxin baahiyaha dhanka shaqada, amaanka, iyo waxtarka ee magaaladu ubaahantahay si bulshada iyo magaaladuba kalsooni ugu qabaan qalabka. Qaababka qimaynta ee wareegga koobaad waxyaabaha lagu fiirinaayay waxaa kamid ah noocyada kaamirada iyo tayada ay leedahay oo uu hubinaayay khabiir madax banaan oo dhanka muuqaalada duubista yaqaana.*

**Meeqo magaalooyin kale ah ayaa adeegsada kaamiroyinka laxirto?**

*Tiro balaaran, oo waaxyada booliiska magaalaooyinka Maraykanka ah iyo aduunyada oo dhan ayaa adeesanaaya ama kashaqaynaaya abuurida kaamirooyinka laxirto ayna kujiran, lakiin aan kaligood ku ahayn: Albuquerque, Atlanta, Baltimore, Chicago, Cincinnati, Dallas, Denver, Ferguson, Hong Kong, Houston, Las Vegas, London, Los Angeles, Miami, Milwaukee, Minneapolis, New Orleans, Oakland, Phoenix, Salt Lake City, San Antonio, San Diego, San Francisco, San Jose, Stockholm, iyo Washington D.C.*

**Maxaa keeni kara in kaamiradu halowdo?**

*Inkastoo kaamirooyinka lxirto ay adag yiiin, hadana way kharibmi karaan. Waxaa lasheegay, in kaamirooyinka ay iskadifaaci karaan markay kasoo dhacaan meel 6 taako dhulka ujirta. Kaamirooyinku waxay sidoo kale leeyihiin Difaaca Biyaha (IP) oodhan illaa cabirka 67, taasoo macnaheedu yahay in lagalin karo illaa hal mitir oo biyo ah ayagoo waxba gaarin, ayana sidoo kale iskadifaaci karaan boorka. Kaamirooyinku waa inay siguud ugu haboon yihiin hawlgalada ay samaynayaan ciidanka sharci fulinta ee Mgaalada Seattle ayagoon marna jabin.*

*Kaamirada waxaa tijaabiyay lataliye madax banaan intii ay socotay hawsha doorashada shirkada wuxuuna kushaqaynaayay 12 saacadood iyo 27 daqiiqo oo muuqaal ay duubaysay illaa batariga kadhacay. Muuqaalada waa la arki karaa marka batarigu dhaco. Saraakiishu waxay sitaan qaybo badan oo qalab ah - kuwo koronto kushaqeeya iyo kuwo aan kushaqaynba - kuwaasoo waajahaya shilal badan iyo isticmaal xoogan markay shaqada kujiraan. Majirto aalad aan halaabin. Intii lawaday tijaabinta barnaamijka kaamirada laxirto, kaamirooyinka qaar ayaa shaqada laga saaray kadib markay halaabeen. Saraakiisha waxa isla markiiba lasiiyay kaamiroyin badal u ah kuwii halaabay. Majiraan muuqaalo dhumay sababo laxiriira halaabida kaamirada.*

**Sidee ayaa muuqaalada loo kaydiyaa?**

*Muuqaalada waxaa lagu kaydiyaa nidaamka xog kaydinta ee shirkadeena, ee looyaqaano Nidaamka Kaydka Hawada ee Microsoft Azure Government Cloud. Azure wuxuu waafaqsanyahay siyaasada kaydinta ee laanta Criminal Justice Information Services (CJIS, Adeegyada Macluumaadka Cadaalada Danbiyada) ee Federal Bureau of Investigation (FBI, Laanta Baaritaanada Danbiyada ee heer Federal). Nidaamka kaydintu wuxuu fududaynayaa kaydin amaan ah, asagoo sidoo kale dadka awooda uleh siinaaya inay sifudud kufiiriyaan macluumaadka. Dadka*

*firinaaya waxa fasax siinaaya mamulaaasha nidaamka waxayna muuqaalada kagali karaan kaliya kumbuyuutarada WBS.*

*Muuqaalada waa inay leedahay Magaalada Seattle ayada ayaana lahaanaysa muuqada xataa haddii qandaraaska mustaqbalka lasiiyo shirkad kale. Haddii magaaladu ay kawareegto shirkada oo ay midkale laheshiiso si ay kaamiroyinka laxirto uga qaadato, muuqalada waxaa loo rarayaa kaydka shirkada cusub ee magaalada lashaqayaysa. Inta lagararaayo tiro badan oo muuqaalo ah waa shaqo culus, qandaraaslaha hada WBS lasheegaya ayaan kula heshiinay in markasta oo muuqaalo meel kale loo raaraayo ay shirkadu masuul katahay hawshaas.*

**Amaan intee le'eg ayaa lagu qabaa kaydka?**

*Shirkada adeegga siisa WBS, ee Axon, wuxuu waafaqsanyahay siyaasada kaydinta ee laanta Criminal Justice Information Services (CJIS) ee Federal Bureau of Investigation (FBI). Shirkada Axon iskaashiga laleh, ee Microsoft Azure Government Cloud, ayaa sidoo kale ilaalinaysa siyaasada amaanka ee CJIS. Axon waxay sidoo kale shahaado kahaysataa heerarka xakamaynta maaraynta amaanka oo shahaadadeeduna tahay ISO 27001/27002, iyo 27018. Muuqaalka kujira nidaamka kaydka waa mid laba jibaaran, macnaheeduna yahay in macluumaadka kaysan uu kujiro labo meelood oo kaladuwan si looga foojignaado in macluumaadku dhumo haddii masiibo dhacdo taasoo si fashil yimaada loogasoo kabto.*

*Dhammaan muuqalada waxaa lagusii hayaa kaamirada illaa macluumaadka booliiska laga qoro, ayagoo inaas kadib muuqaalada gudbinaaya nidaamka kaydka. Dhammaan muuqaalada waxaa si sugan loogu wareejiyaa looguna kaydiyaa nidaamka kaydka ayadoo la adeegsanaayo qaabka sugitaanka ee 256-bit AES. Kaamirooyinku waxay adeegsadaan khad internet oo kuxiran si ay macluumaadka ugu gudbiyaan aalada. Xataa haddii qof uu qaab sax ah soomaro ama uu awood uyeesho galitaanka aalada kaydka, Axon waxay leedahay nidaam difaac kaasoo kujira nidaamkjeena faylalka kaydiya taasoo ku adkaynaysa qofka kabaxsan WBS inuu helo ama fiiriyo muuqaal aalada kujira.*

**WBS masii wadaysaa adeegsiga kaamirooyinka 'dash-cam; ee gaariyaasha kuxiran?**

*Haa. Kaamirooyinka gaariyaasha kuxiran waxay macluumaad kale kabixiyaan goobta shilka kuwaasoo muhiim u ah xaqiijinta hufnaanta shaqada ciidanka iyo arimaha cadayn raadinta labadaba. Waxaa intaas siidheer, nidaamka muuqaalada kaariga waxaa kuxiran kaamirooyin gadaal ujeeda oo kuraasta danbe ee gaariga duubaaya si Waaxdu u aragto muuqaalka eedaysanayaasha gaariga cidanka lagusoo qaday, kuwaasoo aysan qaban karin kaarimooyinka askarigu xiranyahay.*